


# Maxaa looga jeedaa waajibka waxbarashada?

Waajibka waxbarashada macnihii su waa inay tahay inaad waxbarato illaa aad 18 sano jirsanayso, haddii inta ka horreysa aanad dhameynin shahaado heerka labaad ee waxbarashada ah.

Marka waajibka waxbarashadu ku saaranyahay waa inaad waxbarashada heerka labaad ama waxbarasho kale oo loogu talo galay ardeyda waajibka waxbarashadu saaranyahay codsataa markaad dhameyso dugsiga hoose-dhexe. Magaalada Helsinki ayaa kormeeraysa inaad gudato waajibkaaga waxbarashada.

Waxbarashada heerka labaad waxaad ku diyaarin kartaa dugsi sare ama machad xirfadeed.



## Waxbarashadu ma lagac baa?

Haddii waajibka waxbarashadu uu ku saaranyahay waxbarashadaada heerka labaad waa kuu lacag la'aan. Taas macnaheedu waa inaad buugaagtaada iyo agabka kale ee waxbarashada aad ugu baahantahay ku helayo lacag la'aan.

Kela-da ayaa sidoo kale u gudaysa nooliga safarada dugsiga ee ardeyda 7 km in ka badan goobtooda waxbarashadu u jirto.




## Waajibka waxbarashada

Maxay tahay  
inaan ka  
ogaado?

Helsinki

# Haddii aanan boos waxbarasho haysaninna?

Haddii boos waxbarasho aad ku heli waydo codsiga guud ee waxbarashada ama sabab kale ay keentay inaanad haysanin boos waxbarasho, waa inaad codsiga aan kala joogsan ku codsataa boos waxbarasho. Codsiga aan kala joogsan waa mid sannadka oo dhan furan, laakiin dugsiyada kala duwan wakhiyada la codsan karo ayaa kala duwan. La soco codisga aan kala joogsan boosaska waxbarasho ee ka soo banaanada adiga oo ka fiirinaya dugsiyada bogagooda internetka am adeegga Opintopolku.



Sawir: Lille Santanen

**Haddii aad adigu heli waydo boos waxbarasho magaalada Helsinki ayaa boos kaaga qaban karta tusaale ahaan waxbarashada TUVA, waxaad halkaas...**



... ka sii korordhan kartaa tusaale ahaan aqoontaada luqadda shahaadada lagu qaadanayo ama awoodahaaga waxbarashada iyo maareynta nolosha



... waxaad kor ugu qaadi kartaa buundooyinkaaga dugsiga hoose-dhexe



... waxaad xattaa ku diyaarin kartaa koorsooyin gaar ah oo qayb ka ah shahaadada dugsiga sare ama machadadda xirfadda.

# Halkeen macluumaad dheeraad ah ka heli karaa?

Haddii machad gaar ah aad wax ku barataba, waxaa kaa caawin kara helidda boos waxbarasho oo kugu habboon hagaha waxbarashada. Haddii boos waxbarasho aanad haysanin kooxda waajibka waxbarashada ee magaalada Helsinki ayaa ka mas'uul ah hagitaanka waxbarashada sii soconaysa.

Kala soo xidhiidh kooxda waajibka waxbarashada cinwaanka [oppivelvollisuustiimi@hel.fi](mailto:oppivelvollisuustiimi@hel.fi).

